



XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

WARSAXAAFADEED 33/2014

Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya ayaa cambaareeyay dilka loo geystay haweeney xildhibaan ahayd

Muqdisho, 23 July 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa cambaareeyay dilka loo geystay Saado Cali Warsame, oo ahayd haweeney xildhibaan ah oo ka tirsan Baarlamaan Federaalka Soomaaliya, wuxuuna caddeeyay inuu aad uga welwelsanyahay weerarrada joogtada ah ee lagu bartilmaameedsanayo xildhibaanada.

Marwo Saado Cali Warsame iyo daraawalkeediba waxaa lagu toogtay oo lagu dilay iyadoo gaari ku wata magaalada Muqdisho maanta. Iyadoo ahayd xildhibaan baarlamaanka ka tirsan ka sokow, Marwo Saado Cali Warsame waxay ahayd fanaanad caan ah oo heesaa ah oo dhimashadeeda aad looga dareemi doono dhammaan Soomaaliya.

“Waxaan sida ugu adag oo suurtagalka ah u cambaareynayaa dilka loo geystay Saado Cali Warsame. Waa in dadka oo idil ay ilaaliyaan ayna dhowraan kaalinta ay haweenka Soomaaliyeed kaga jiraan nolosha bulshada guud,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay.

“Waxaan ugu baaqayaa hayda’aha dowladda inay dadaal kasta ku bixiyaan si kuwa dilkan geystay si degdeg ah caddaaladda loo hor keeno. Waxaa naga go’an inaan sii wadno taageerada aan u fidino dadka Soomaaliyeed iyo wakiilladooda iyadoo ku hawlan si ay u gaari lahaayeen himiladooda iyo rajada ay ka qabaan mustaqbal nabad ah oo xasilloon,” ayuu raaciyay. Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay wuxuu taci tiiraanyo leh u tiray qoyska iyo saaxiibada Marwo Saado Cali Warsame iyo daraawalkeeda, iyo weliba Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.